

Warbixin ku saabsan maqnaanshaha iyo joogitaanka ardayda**Maqnaansho:**

Wac 0580-709 006. Cod baa ku oranaaya qor ardayga lambrikiisa qof ahaaneed(barnets personnummer)

Waxaa fariin dhinaca talefoonka ah laguugu soo dirayaa in la diiwaangeliyey maqnaanshaha ardayga. Ogow waa in maqnaanshaha ardayga lasoo diiwaangeliyaa maalin walba ee uu maqan yahay. Warbixinta ku saabsan diiwaangelinta maqnaanta ardayga waxaad ka heli kartaa hoyga degmada ee dhinaca internetka (www.ljusnarsberg.se)

1. Ka maqnaanta hal cashar tusaale ahaan . Tegitaanka dhakhtarka ilkaha , shir iwm. Waxaa xitaa loo samaynayaa sida aan kor kusoo sharaxnay
2. Caruurta la qariyey aqoonsigooda ama aan lahayn lammbarka qofka oo buuxa waxaa maqnaanshahooda lagu soo dirayaa dhinaca boostada internetka, ciwaankaan gunilla.andersson3@ljusnarsberg.se
3. Haddii barnaamijka la yiraa Dexter uu shaqeyn waayo, waxaa maqnaanshaha lagu soo dirayaa sanduuqa bostada dhinaca internetka ciwaankaan: gunilla.andersson3@ljusnarsberg.se

Iskuulka la yiraa (Kyrkbacksskolan)waxaa uu in muddo ah ka shaqeynaayey inuu kor u qaado joogitaanka ardayda, koox gudi arday baa la dhisay si ay ugu shaqeeyaan qaab ka hortag ah, dhiigrigelin iyo dib u eegis ah. Ujeedadu waxaa weeye in ardayda loo abuurto jawi nabagelyo oo ay ku horumari karaan iyadoo lala shaqeynaayo waalidka si ay ardaydu u gaaraan heerka aqoonta ee la doonaayo.

Qofka waalidka ayaa waajib ka saaran yahay inuu diiwaangeliyo kolka ilmihiiisu maqan yahay ee aanu iskuulka imaan karin. Waxaa uu iskuulku waalidka u caddeynayaa in aaney SOO DIRI KARIN wax fariin ah, ama warqad dhinaca internetka ah (mail) ama aanay soo waci karin macalimiinta iskuulka balse ay ardayga maqan u diiwaangelinayaa maqnaantiisa sida aan kor kusoo sheegnay.

Haddii uu ardaygu qaadanaayo fasax waa in kolkaas waalidku buuxiyaa foomka codsiga fasaxa. Foomkaas waxaa laga heli karaa hoyga degnada (www.ljusnarsberg.se) , qaybta arrimaha daryeelka caruurta. Foomka dalabka fasaxa waxaa loo dhiibayaa macalinka ardayga masuulka ka ah.

Macalinka masuulka ahi waxaa uu ardayga siin karaa halmaaln oo fasaxa, waxii intaas ka dheer waxaa go`aankeeda iska leh maamulaha iskuulka. Kooxda qaabilsan xaadirinta ama ka warqabka in ardaydu iskuulka joogaan ayaa waxaa loo gudbinayaa haddii ardaygu fasax helo iyo haddii kaleba.

Maqnaanshaha la ogyahay iyo midka aan la ogeyn

Iskuulka lagu magacaabo (Kyrkbacksskolan) ma dhiibo wax fasax ah wakhtiga la sameynaayo imtixaanaadka wadanka oo dhan laga sameeyo (nationella prov).

Maqnaanshaha lasoo gudbiyo iyo midda aan lasoo sheeginba wakhtiyada qaarkood waxaa ay noqon karaan dhib dheeraad ah.

Kooxda la socda in ardaydu iskuulka xaadir ku yihiin iyo kooxda ka shaqeeya caafimaadka ardayda ayaa wakhti hore lagu soo xiraa si ay u ogaadaan nooca maqnaanshuhu yahay.

Maqnaansho la ogolaadayiyo mid aan la ogolaanba waxaa ay marwalba keentaa in loo gudbiyo waaxda arrimaha bulshada(socialtjänsten).

Waxii su'alo ah oo ku sabsan joogitaan/maqnaansho ardayda ah la xiriir kooxda caafimaadka ardayda:

Gunilla Andersson

gunilla.andersson3@ljusnarsberg.se

072-856 09 29